



IKAASHIGA DERISKA -

Ka dhan ah jabsiga iyo wax yeeleynta

Magaalada Trollhättan waxaa ahmiyad gaar ah la siiyaa hawsha siddii loo abuuri lahaa jawi xasiloon. Xasiloonidu waxaa ay ka mid tahay waxyaabaha ugu muhiimsan baahida aasaasiga ah ee aadanaha.

Sidaa awadeed naga caawi fadlan in aan idika caawino in kor loo qaado abuurista xasiloonida xaafada aad degentihiin iyada oo la adeegsano iskaashiga deriska.

Iskaashiga derisku waa shabakad bulsho oo ay abuureen dadka degen deegaan kaas oo ay ulajeedadiisu tahay wada shaqayn, is kaalmeyn iyo is caawin, si loo dhimo fal dabiyeedka isla markaana kor loogu qaado xasiloonida qoyska iyo hantida. Iskaashiga derisku waa mid tabaruca gabi ahaanba waana mid lacga la'aan ah.

Habkan waxaa la isticmaaleyey mudo qiyaastii 40 sano ah, laakiin waxaa ilaa hadda laga higeliyey oo kaliya guryaha safka dhaadheer iyo filooynka (radhus och villor). Laakiin waxaa hadda la joogaa wakhigii taas la badeli lahaa. Shirkada guryaha ee degmaga Trollhättan (Trollhättans Bostadsbolag) ee lagu magacaabo AB Eidar ee magaalada Trollhättan (Trollhättans Stad) iyo ciidan booliiska ayaa ka danbeeya talaabadani iskaashiga deriska ee laga hirgaliyey guryaha ay deganyihiin qoysaska badan (flerfamiljshus) ee Trollhättan. Farsamada ah in loo bedelo "cabasho" iyo "saluug" ku aadan guryaha dadka kale, meelaha la wadaago iyo goobaha ku xeersan waa talaabo wax ku ool leh.

Cilmi baadhis la sameeyey waxaa ay muujineysay in macaamiisha degen guryaha ay intooda badan saluugsanyihiin ama aysan ku qanacsaneyn waxayaabaha ay sababaan dadka degen agtooda, degen isla hal dhismo ama degen deegaanka ku xeeran. Meel kasta waxaa la eedeynayaa "cidda" geysaneysa ee masuulka ka ah dhibaataadaas dhacaysa. Cid kale ayaa qaadeysa mas'uuliyada oo xalineysa dhibaataadaas. Waxaa ay noqoneysaa in inta badana ay bulshadu ama shirkada iska leh guryaha ay dhibka xaliyaan taas oo keeneysa in kharashku kor u kaco oo uu adiga dib kuugu soo noqdo.

Bulshada aynu maanta ku noolnahay, taas oo ay nolushu tahay qaali, waxaa habooneyd in aan ka qayb qaadano oo aan ugaadhsano ama daba galno "cidda". Waa in aan inagu yeelanaa dhibaataada. Markaa haddii aan is barano dadkeena degan xaafad waxaa meesha ka baxaya "cidda" oo aan inaka iyo adigu wada jirno.

LA XIDHIIDH:

Gigi Cederholm, koordinator Trollhättans stad, 0520-49 79 77, gigi.cederholm@trollhattan.se





Trollhättans
Stad



Polisen

"Iskaashiga derisku waxaa uu caawinayaa in la abuurro xasilooni maadaama la is baranayo. Kulumada lagu kulmayo jaranjara-da guriga (trapphus-träffarna) waxa aan kari lahaynin aan isla ogaano waxa dani ugu jirto macaamiisha dagan guriga. Waxaa ay tani ku abuurtay xiiso aad u weyn dadka degen degaanka."

Uruka macaamiisha kireysta guryaha ee Karlskrona
Hyresgästförening, Karlskrona

Sidan buu u shaqeyaa iskaashiga derisku

SIDEE BAAN U BILAABI KARAA KOOX?

- In lala sameeyo xidhiidh deriskaaga oo isla markaana baadhitaan lagu sameeyo inta uu dhan yahay xiisaha loo qabo in la bilaabo barnaamijka iskaashiga deriska.
- Marka aad go'aansataan in aad bilowdaan koox la xidhiidha isku duwaha magaalada Trollhättan (Trollhättans Stad). Waxaa aan markaa ka dib ku heshiin doonaa maalin ku haboon si kormeer ugu sameyno xaafada anaka/anaga iyo ciidanka booliska oo wada jirna.
- Waxaa fiican in aad doorataan qof idiin qaabilsan xidhiidhka xaafadiina si kormeerka lagu sameynayo xaafadu u hir galo.

HAWSHA QOFKA QAABILSAN XIDHIIDHKA

- In uu sameeyo liiska magacyada a ka qayb galayaasha ee degan xaafada.
- In uu ugudbmiyo magacayada ka qayb galayaasha isku duwaha magaalada Trollhättan (Trollhättans Stad).
- In uu la kormeero ciidanka booliiska xaafada iyo in uu go'aamiyo meesha lagu xidhayo tabeelayaasha.
- In uu qaybiyo qalabka macluumaadka iyo tabeelayaasha ka qayb galayaasha.
- In uu xidhiidhiyo ka qayb galayaasha iyo isku duwaha
- Wargaliyo macaamiisha cusub ee u soo guurta xaafada arimaha ku saabsan iskaashiga derika.
- Wargaliyo isbedlka liiska magacyada ka qayb galayaasha isku duwaha.
- In uu ka qayb galo kulanka daba socoshada iyo kulanka sanadlaha ah ee loogu magac daraya habeenka xasiloonida (trygghetskvällen).

MACLUUMAADKA KA QAYB GALAYAASHA

- Calaamadee hantida qiimaha leh ee la xadi karo iyo waliba liiska hantida guurta. Sawida iyo boonooyinka/rasiidku waxaa ay u fududeeyaan ciidanka booliiska in ay raad raacaan alaabta lagu qabto qofka laga shikisanyahay waxaa kale oo ay taasi adiga kaa caawineysaa in aad la xidhiidhi karto shirkada caymiska.
- Wargali dariska iyo qofka qaabilsan xidhiidhka-iyo /ama ka qayb galayaasha haddii aad baxayso safar qaadanaya mudo ka badan hal todobaad.
- Ku xafid dukumatiyada qiimaha leh iyo waxyaabaha qaaliga ah meel huban, ka feejignow in aad ku xafido alaabtaas meel laga arki karo oo u dhow daaqada ama dariishada.
- Waa in aad si guud ahaaneed u feejignaato. La xidhiidh ciidanka booliiska, qofka qaabilsan xidhiidhka-iyo /am aka qayb galayaasha haddii aad aragto wax "qaldan".
- La xidhiid mar kasta ciidanka booliiska haddii aad ka shikodo fal danbiyeed.

MAXAAN SAMYAN KARAA ANIGU?

- Mar kasta quful iridka hore, xitaa marka aad joogto guriga.
- Samee waxa kasta oo loogu maleyn karo in gurigu yahay mid la daganayhay, isticmaal mar kasta timer daara/shida mar kasta nalka gudaha iyo raadiyoo.
- Ku xidh alaarm guriga.
- Telofoonka guriag ku xidhiidhi maal kale ha ku duubin cajalada jawaabta ama (ansuwer mishiinka) wax fariin ah oo sheegaya inaad ka maqantahay guriga.
- Hubi in uu jiro qof sii fiiriya guriga mudada aad ku maqantahay safarka

MACLUUMAAD:

trollhattan.se/brottsforebyggande

Gigi Cederholm,
koordinator Trollhättans stad,
0520-49 79 77
gigi.cederholm@trollhattan.se